

Jamhuuriyada Somaliland

10-October-2011

Ku: Shirgudoonka Golaha Wakiilada JSL

Ujeedo: Soo jeedin waxka bedel xeer No-20; 2002

Anaga oo ka duulayna xaqa Dastuuriga ah ee ay dhalinyaradu u leedahay in ay ka qayb qaataan hogaaminta iyo talada dalka, isla markaana xoojinayna in ay muwaadinka iyo musharaxuba ay u helaan codkooda si cadaalada oo aan musuq iyo mad-madowtoona ku jirin.

Haddaba, anaga oo ah mudanayaasha magacyadoodu hoos ku qoran-yihiin waxaanu halkan ku soo jeedinaynaa waxka bedelka xeer No: 20/2002, gaar ahaan qoddobadan hoos ku qoran:

Qoddobka 22^{aad} oo ah habka doorashada Golayaasha Deegaanka;

Qoddobkan oo ahaa habka liistada waxaanu soo jeedinaynaa in loo bedelo sidan;

1. Xisbi/Urur kasta oo doonaya in uu ka qayb galo doorashada Golayaasha Deegaan, waa in uu komishinka Qaranka u gudbiyo liiska musharaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in komishinku siiyaa musharax kasta astaan u gaar ah.
2. Kuraasta Degmo-doorasho, Waxaa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami qaybsiga (*Proportional Representation System*) ee kuraasida iyo codadka xisbi/Ururkasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu xisbiga/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala codbadan yihiin.
3. Musharaxiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxay noqonayaan kayd, iyadoo loo kala qaadanayo sida ay u kala codbadan yihiin, marka xubin ama xubno ka mid ah Golaha Deegaanku uu baneeyo xilka.

Qoddobka 33^{aad} oo ah shuruudaha Musharaxiinta Golayaasha Deegaanka;

Qoddobkan 33^{aad} Farqadiisa 4^{aad} oo ahaa qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa in aanu/aanay da'diisu/Dadeedu ka yaraan 35-jir sanadka doorashada. Qoddobkan waaxaanu soo jeedinaynaa in lagu bedelo sidan:-

Qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa in aanay Da'diisu/Dadeedu ka yaraan 25-jir sanadka doorashada

Page-1

Artafay
Diimarsaleys
Xaraleys

2/11/2011
24/11/2011